

Waa maxay tilmaantaan?

Dukumeentigaan waxbarasho waxaa lagu soo saaray qayb ka mid ah mashruuca Doorqa Isku haynta Bulshada ee Magaaloyinka Burbursan iyo Xaaladaha Khilaafaadka (SoCap). Waxay qeexaysaa tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu dhisayo habka cilmibaadhiseed ee bulshadu ku salaysan (CRP). Waxaa la socda warbixin cilmi baaris dadweyne oo bixinaysa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baahida iyo sababaha CRP-yada, iyo sidoo kale dhaqanka wanaagsan iyo dabinnada waawayn ee laga fogaado (**lifaaqa**).

Yaa loogu talagalay tilmaamahan?

Tilmaamahan waxaa loogu talagalay shaqaalaha farsamada, barnaamijyada iyo waxbarashada ee Concern, iyo sidoo kale xirfadlayaasha cilmi-baarista ee ay la shaqeeyaan, kuwaas oo doonaya inay xoojiyaan lahaanshaha bulshada iyo isla xisaabtanka mashaariicda cilmi-baarista.

Waa maxay CRP-yadu?

CRP-yadu waa nooc ka mid ah dib-u-eegista anshaxa oo si weyn ugu lug leh bulshooyinka cilmi-baarista lala sameynayo. Waa qayb ka mid ah habab ballaaran oo ka-qaybgal ah oo raadinaya iskaashi iyo wada shaqeynta bulshooyinka halkii laga samayn lahaa cilmi-baarista ku saabsan ama ku saleysan bulshooyinka.

Maxay CRP-yada faa'iido u leeyihiin?

CRP-yadu waxay gacan ka geysan karaan 1) hubinta in bulshadu ay ku lug yeelato naqshadeynta mashruuca cilmi-baarista, oo ay ku jiraan iyadoo wax laga qabanayo dheelitir la'aanta awoodda ee soo noqnoqda ee u dhaxaysa cilmi-baarayaasha iyo dadka lagu sameynaayo cilmi-baarista; 2) ilaalinta xubnaha bulshada iyo yaraynta waxyeelada; 3) kor u qaadidda lahaanshaha bulshada ee natijoooyinka, hubinta in aqoonta la soo saaray ay khuseyso oo ay waxtar u leedahay bulshada; 4) aqoonsashada iyo taageeridda khibrada bulshada; iyo 5) kor u qaadida suurtagalnimada.

DULMAR

Waxaa jira 10 tallaabo oo lagu taageerayo aasaasidda ama shaqada CRP:

1. Aqoonsiga cidda 'bulshadu' tahay;
2. Xiriir lala sameeyo saamileeyda muhiimka ah ee la aamini karo;
3. Hubinta fasiraadda iyo turjumaadda;
4. Soo bandhigidda qorshe cilmi-baarista iyo wadahadal lala yeesho bulshada;
5. Waqti u ogolaanshaha bulshada si ay uga fiirsadaan mashruuca;
6. Helintaanka ogolaansho xog ogaal ah, oo firfircoon heer bulsho iyo heer shaqsiyeed;
7. Sameynta heshiiska cilmi-baaraha iyo bulshada;
8. Aqoonsiga koox farsamo oo loogu talagalay maaraynta iyo falanqaynta xogta;
9. Dib-u-eegista miisaaniyadda iyo qoondaynta kheyraad dabacsan si waafaqsan;
10. Saaridda dib-u-eegis joogto ah iyada oo loo marayo jawaab celin iyo dabagal.



01 AQOONSIGA CIDDA 'BULSHADU' TAHAY

Aqoonsiga cidda bulshada kamid ah ee ku lug yeelan doonta cilmi-baarista. Cilmi-baarayaashu waa inay tixgeliyaan:

1. **Goobta** – bulshadu juqraafi ahaan waxaa lagu qeexaa tuulo, xaafad, ama deegaan?
2. **Dadka** – yaa ka mid ah bulshada marka loo eego kooxaha muhiimka ah ama dadka? iyo
3. **Awood** – yaa ka mid ah bulshada loogu talagalay ayaa haya jagooyinka maamulka? Yaa la takooraa, oo dhaqan ahaan laga reebo go'aan qaadashada, iyo/ama cilmi-baarista xad-dhaaf ah lagu sameeyaa? Tallaabooyin nooc ee ah ayaa la qaadi karaa si loo hubiyo in ka-qaybgalka bulshadu uu yahay mid loo dhan yahay oo ka tarjumaya isbadellada?

02 XIRIIR LALA SAMEEYO SAAMILEEYDA MUHIIMKA AH EE LA AAMINI KARO

La shaqeynta daneeyayaasha muhiimka ah ee xiriir dheer la leh bulshooyinka la aqoonsaday, kuwaas oo xubnaha bulshadu ku kalsoon yihiin, isla markaana leh aqoon ballaaran oo ku saabsan macnaha guud. Kuwaan waxaa laga yaabaa inay xubno ka yihiin kooxda cilmi-baarista si toos ah, iyo/ama ay yihiin hoggaamiyayaasha bulshada ama wakiillo ay kooxda cilmi-baarista ama shaqaalaha Concern xiriiri la leeyihiin.

03 HUBINTA FASIRAADDA IYO TURJUMAADDA

Kahor intaadan si toos ah ula macaamilin bulshooyinka, aqoonso turjubaanada iyo fasireyaasha sida loogu baahdo si loo taageero isgaarsiinta mashruuca. Dhammaan agabka iyo wadahadallada mashruuca ee lala yeelanayo bulshada waa in la fududeeyaa iyada oo loo marayo 1) luuqadda iyo ereyada ay bulshadu doorbideyso; iyo 2) qaabab la heli karo oo ku habboon oo tixgelinaya arrimo ay ka mid yihiin akhriska iyo wax qorista, sawir-qaadista dhaqanka ku habboon iyo tixgelinta la xiriirta. Waa in ay jirtaa wadahadal iyo jawaab celin joogto ah oo ku saabsan hababka isgaarsiinta ee ku habboon oo la heli karo, kooxda cilmi-baaristuna waa inay u furnaadaan inay si waafaqsan u waafajiyaan hababka isgaarsiinta.

04 SOO BANDHIGIDDA QORSHE CILMI-BAARIS IYO WADAHADAL LALA YEESHO BULSHADA

Sameynta kulamo joogto ah oo lala yeesho xubnaha bulshada si looga wada hadlo dhinacyada muhiimka ah ee mashruuca, oo ay ku jiraan naqshadeynta mashruuca la soo jeediyay, iyo ka dib, hirgelinta, iyo natiijooyinka. Ka qaybgalka bilowga ah ee xubnaha bulshada waa lagu dejiyaa qorshayaasha cilmi-baarista guud, laakiin kuwani waa inay noqdaan kuwo dabacsan oo ku filan si loo hubiyo in aragtida bulshada, iyo kartida hal-abuurka iyada oo loo marayo dib-u-eegista bulshada, la isku dari karo. Halkii cilmi-baarista lagu soo bandhigi lahaa si hal dhinac ah, cilmi-baarayaashu waa inay u diyaar garoobaan hoggaamiyayaasha bulshada ama wakiillada si ay u hoggaamiyaan ama u dhexdhexaadiyaan wadahadalka si ay gacan uga geystaan is-weydaarsi caddaalad ah. Qor qodobada kulanka oo hayso diiwaanka waxa laga wada hadlay. Qodobada kulanka waxaa lagu duubi karaa qaabab qoraal ama cod ah, iyadoo ku xiran ogolaanshaha dadka ku lugta leh, iyo iyadoo ku xiran waxa bulshadu u aragto qaabka ugu habboon.

05 U OGOLOW WAQTI BADAN CRP SI AY U TIXGELISO KU HABBOONAANTA MASHRUUCA

Waa in la helaa waqti ku filan oo bulshadu si buuxda uga fiirsato ku habboonaanta mashruuca la soo jeediyay. Kahor inta aysan ogolaan in loo sii gudbo marxaladda xigta, xubnaha bulshadu waa inay tixgeliyaan su'aalaha soo socda:

1. Cilmi baarista lagu taliyay ayaa waafaqsan muhiimada cilmi baarista ee lagu cadeeyay bulshadeena?
2. Bulshadu awood ma u leedahay ka qaybgalka cilmi baarista wakhtigaan iyo dhammaan mudada uu soconayo mashruuca lagu taliyay? Tusaale ahaan, ilaha bulshada – waqtiga, khibradda iyo wax-soo-saarka – horey ma loogu ballanqaaday ama loogu kordhiyay dadaallo kale ama mashaariic cilmi-baarista?
3. Waa maxay suurto galnimada mashruuca la soo jeediyay uu waxyeello ugu geysan karo bulshada? Waa maxay faa'iidada mashruuca lasoo jeediyay uu u yeelan karo bulshada, iyo dadka saamayntu ku dhacayso?
4. Maxaan u maleyneynaa in lagu adkeeso dib-u-eegista anshaxa cilmi-baarista bulshada?
5. Sidee dib-u-eegista bulshadu uga duwanaa kartaa dib-u-eegista hay'adaha?

06

HELINTAANKA OGOLAANSHO XOG OGAAL AH, OO FIRFIRCOON HEER BULSHO IYO HEER SHAQSIYEED

Qaado hab qaybo kala duwan leh oo lagu helo ogolaansho xog ogaal ah. Tani waxay ku lug leedahay helitaanka ogolaansho kooxo badan oo heerar kala duwan ah marxalado badan, iyadoo:

1. La go'aaminaayo cidda awoodda u leh inay bixiso ogolaansho ayadoo ku hadlaysa magaca bulshada si ay u sii waddo mashruuca cilmi-baarista ee bulshada dhexdeeda, sida hoggaamiyeyaasha bulshada ama wakiillo ka kala socda kooxo kala duwan (fiiri qodobbada kore ee ku saabsan: wakiilada bulshada);
2. Helitaanka ogolaansho xog ogaal ah oo ka timid wakiilladaan;
3. Aqoonsiga cidda bulshada dhexdeeda ah ee si toos ah uga qayb qaadan doonta cilmi-baarista (tusaale ahaan, ka jawaabista sahaminta, ka qayb qaadashada wareysiyada);
4. Raadinta ogolaansho xog ogaal ah oo ka timid shakhsiyaadkan si toos ah ka hor inta aan la bilaabin cilmi-baarista;
5. Sii wadista raadinta ogolaanshaha heer bulsho iyo mid shaqsiyeedba mar-mar inta daraasaddu socoto, gaar ahaan marxalad kasta oo qalabka dib loo eego oo dib loo hawlgeliyo.

07

SAMEYNTA HESHIISKA CILMI-BAARAH IYO BULSHADA

Heshiis rasmi ah oo dhexmara xubnaha bulshada iyo cilmi-baarayaasha. Heshiisku waa inuu hubiyaa in qof kasta oo ku lug leh daraasadda uu si cad u fahmo doorkiisa, waxa laga filayo, iyo sababta ay wax ku darsigoodu muhiim u yahay oo ay muhiim u yihiin. In kasta oo tani ay qayb ka noqon karto hababka cilmi-baarista guud ee ka-qaybgalka si ballaaran, heshiis lagu sameeyay ama lagu wargeliyay habka CRP wuxuu ka koobnaan doonaa cabbirro anshax oo gaar ah.

Heshiisku waa inuu si cad u qeexaa:

- Yaa daraasadda sameynaya;
- Ujeeddada iyo yoolalka cilmi-baarista;
- Baaxadda cilmi-baarista – gaaritaanka deegaanka, muddada, iyo hababka la adeegsanayo;
- Dhinacyada heshiiska iyo mas'uuliyadahooda, oo ay ku jiraan sharraxaada cad ee doorarka;
- Faahfaahinta ballanqaadyada anshaxa ee ku saabsan i) ogolaanshaha; ii) sirta; iii) ilaalinta; iyo iv) waxyeelo la'aanta;
- Khataraha anshaxa ee lagu aqoonsaday naqshadeynta cilmi-baarista iyo sida loo yareynaayo;
- Marka kulamo goos-goos ah lala yeelan doono bulshada si loo bixiyo warar cusub, wax looga qabto su'aalaha ama walaacyada, iyo/ama loo mideeyo jawaab celinta bulshada;
- Faahfaahinta lahaanshaha xogta daraasadda iyo sida loo maamuli doono;
- Sida natiijooyinka loogu faafin doono si anshax iyo macno leh;
- Waa maxay hababka isla xisaabtanka iyo xallinta khilaafaadka ee loo dejiyay dhammaan kuwa ku lugta leh;
- Wax kasta oo kale oo ay u arkaan inay khuseeyaan oo ay ku habboon yihiin iskaashatada bulshadu.

Qaabka heshiiska waa in si wadajir ah ay u go'aamiyaan dadka ku lugta leh mashruuca. Tusaale ahaan, waxay qaadan kartaa qaab heshiis qoraal ah; kulamo joogto ah si loo dhiso ogolaansho firfircoon, xog ogaal ah oo joogto ah, ama qaabab isku dhafan (tusaale ahaan qaabab qoraal iyo af ah).

Iskaashatada bulshadu waa inay weyddiiyaan: Heshiiska cilmi-baarayaasha iyo bulshadu ma yahay mid caddaalad ah marka la eego wadaagga faa'iidooyinka, natiijooyinka mashruuca, iyo qorshayaasha lagu sameynayo laguna faafinayo cilmi-baarista? Qof kasta oo ku lug leh daraasadda waa inuu helaa fursad uu ku heli karo heshiiska, waana inuu si cad u fahmaa waxa ku jira.

08

AQOONSIGA KOOX FARSAMO OO LOOGU TALAGALAY MAARAYNTA IYO FALANQAYNTA XOGTA

Ku darista tilmaamaha heshiiska cilmi-baarista ee ku saabsan maaraynta, kaydinta, helitaanka, iyo falanqaynta xogta cilmi-baarista. Meesha ay ku habboon tahay, tan waxaa lagu dari karaa tababar loogu talagalay cilmi-baarayaasha bulshada ee ka shaqeeya xogta xasaasiga ah. Iskaashatada bulshadu waxay dooran karaan inay dhisaan koox farsamo oo doorkoodu yahay inay si toos ah ula shaqeeyaan xogta mashruuca, qaabaynta falanqaynta iyo natiijooyinka. Marka ay sidaasi dhacdo, kala shaqee hoggaamiyeyaasha bulshada si ay si wadajir ah u aqoonsadaan xubnaha bulshada ee kooxda farsamada kuwaas oo gacan ka geysan doona maaraynta xogta iyo falanqaynta.

09

DIB-U-EEGISTA MIISAANIYADDA IYO QOONDEYNTA KHEYRAAD DABACSAN SI WAAFAQSAN

Inta suurtoogalka ah, kooxda cilmi-baaristu waa inay qaataan miisaaniyad dabacsanaan ku filan si ay u daboolaan baahiyaha ay bulshadu aqoonsatay, sida kharashyada ay ku jiraan shaqaalaynta xubnaha bulshada sida shaqaalaha, iyo bixinta gunnooyinka ama magdhowga kharashyada ka-qaybgalka. Tani waxay ku lug yeelan kartaa miisaaniyad u sameynta gunnada, safarka, cuntada, daryeelka carruurta, iyo kharashyada kale, sida ay u arkaan iskaashatada bulshada inay ku habboon yihiin dhaqan ahaan iyo macne ahaan. Xubnaha bulshadu waa inay ku lug yeeshaan dejinta miisaaniyadda mashruuca.

10

SAARIDDA DIB-U-EEGIS JOOGTO AH IYADA OO LOO MARAYO JAWAAB CELIN IYO DABAGAL

Cilmi-baarayaashu waa inay qorsheeyaan ka qaybgalka bulshada marxalad kasta oo cilmi-baaris ah. Tani waa inay ku lug yeelato ku darista fursado loogu talagalay talo-bixin ballaaran oo bulsho; xiriir, wadahadal, iyo kulamo joogto ah; isla xisaabtan labada dhinac ah; hufnaan; iyo fursadaha dabagalka. Mashaariicda muddada dheer, jadwalka 'hab-dhawrka anshaxa' ee joogtada ah si qaab wadajir ah dib loogu eego khataraha anshaxa, istaraatiijiyadaha jira ee lagu maareeyo kuwan, iyo u hoggaansanaanta ballanqaadyada anshaxa, waa inay qayb ka noqdaan jadwalka qaabaysan ee mashruuca. Mar kasta oo ay suurtoogal tahay, dabagalku waa inuu ka dheeraadaa meertada nolosha mashruuca.

Xubnaha CRP waa in ay tixgeliyaan in cilmi baarista lagu taliyay ay waafaqsan tahay muhiimada cilmi baarista ee bulshadu dejisay. Yay u badan tahay inuu ka faa'iideysto, waase maxay suuragalnimada waxyeelada? Xubnuhu waa inay isweydiyaan: Heshiiska cilmi-baarayaasha iyo bulshadu ma yahay mid caddaalad ah marka la eego wadaagga faa'iidooyinka, natiijooyinka mashruuca, iyo qorshayaasha lagu sameynayo laguna faafinayo cilmi-baarista?

DULMARKA HABKA CRP EE SHAQEYNAAYA

Jessica Hsu iyo Louino Robillard ayaa si wadajir ah u hogaaminaya hirgelinta mashruuca SoCap ee Cité Soleil, Haiti iyadoo ay weheliyaan Gwoup Konbit. Gwoup Konbit (**lifaaga**) waa dhaqdhaqaaq bulsho iyo madal Haytitaan ah oo fududaynaysa isku xirka, wadaagga kheyraadka, iyo is-weydaarsiga aqoonta ee hoggaamiyeyaasha iyo kooxaha taageera mabaadi'da konbit. Konbit waa qaab dhaqameed, taariikhi ah oo shaqo wadareed ah oo ku salaysan gargaar wadaag iyo midnimo – fikrad xooggan oo ka jirta Haiti oo Gwoup Konbit ay u isticmaashay dhisidda dhaqdhaqaaqeeda. Marxaladihii hore ee mashruuca SoCap, kooxdu waxay dejisay habka CRP si loo hubiyo in mudnaanta bulshada, walaacyada, xuquuqda iyo ilaalinta ay udub dhexaad u yihiin anshaxa cilmi-baarista mashruuca. Hoos, waxay ku sharraxayaan habka loo aasaasay CRP ee Cité Soleil oo qayb ka ah mashruuca SoCap:

S: Ma sharxi kartaa taariikhda Gwoup Konbit iyo sida ay taasi u saamaysay dejinta CRP oo qayb ka ah mashruucan?

Gwoup Konbit wuxuu horey uga koobnaa hoggaamiyeyaal bulsho oo da'yar. Waa dhaqdhaqaaq bulsho. Tani waa aasaaska fahamka – kala barashada dadka, waa maxay xaqiiqooyinka degaanka ah, waa kuwee hoggaamiyeyaasha? Gwoup Konbit laftiisu horeyba, xitaa kahor hawshan, wuxuu ka shaqeynayay sidii uu u fahmi lahaa una taageeri lahaa xoogga bulshada. Shan sano ayaa laga joogaa markii aan faahfaahin ka bixinay 'Konbit' oo ah qalab horumarineed oo bulsho, taasoo runtii na gaarsiisay meel aan diyaar u ahayn inaan si dhab ah u beddelno si aan u tijaabino habab cusub. Mid ka mid ah qiimayaasha kale ee Gwoup Konbit waa isku-tiirsanaanta. Waxaan u aragnaa geeddi-socodka mid isku-tiirsanaan ah – kooxda cilmi-baarista, CRP, iyo iskaashatada kale – dhammaanteen waan isku tiirsannahay.

S: Ma sharxi kartaa xubinnimada CRP ee mashruuca SoCap?

Waxaa jira qiyaastii 20 qof oo ku jira CRP, 6 ama 7 ka mid ah waa dumar. Waxaan hubineynaa inaan yeelanno hoggaamiyeyaal ka kala socda dhammaan deegaanada. Waa hoggaamiyeyaal hore u lahaa khibrad. Tusaale ahaan, hal xubin waa wakiil ka socda maamulka deegaanka; mid kalena waa wadaad; inta soo hartayna waa hoggaamiyeyaasha ururada ee bulshooyinkooda.

S: Sidee muhiim u ahayd in la tixgeliyo xiriirka awoodda iyo dhaqdhaqaaqa bulshada dhexdeeda marka la dejinayo CRP?

Waxay ahayd mudnaanta koowaad ee aanu siinnay. Cité Soleil waa meel yar oo aad iskugu dhafan. Baloog kasta waxaa kala soocaya difaac aan la arki karin oo aadan arki karin, laakiin wuu jiraa. Waa inaan qof ka mid ah bulsho kasta ka qaybgelinaa, oo aan bulsho kasta u qaadannaa xaaladdeeda gaarka ah. Waxaan dhisnay CRP, iyo xitaa kooxdeenna farsamada, oo ku wareegsan xiisado iyo dheelitirnaan kala duwan – hadday tahay luqad ama lacag, iwm. Waxaan had iyo jeer isweydiineynaa: sidee ayaan u maarayn karnaa dheelitir la'aanta helitaanka, awoodda, iyo wax kasta oo ay noqon karto.

S: Nooc ee fikrad ah ayay CRP bixisay marka ay timaado horumarinta, tijaabinta iyo ansixinta qorshayaasha iyo qalabka cilmi-baarista?

Markii aan su'aalaha u soo bandhigaynay CRP, waana koox dad ah oo runtii isku kalsoon. Waxa xiisaha lahaa waxay ahaayeen jawaabaha – xubnaha CRP waxay soo bandhigeen waxqabad ku saabsan waxa ay filayeen caqabadaha ka dhici doona bulshooyinka laftooda, waxa ay ogaayeen inaan la kulmi doono marka aan su'aalaha weydiineyno. Waxaan tijaabin jirnay su'aalo wayna nala doodi jireen, iyagoo leh waxyaabo ay ka mid yihiin – *Maxaad maanta ii keentay? Sidee bay tani waxtar ugu yeelan doontaa bulshadayda? Aad bay muhiim u ahaayeen. Way na diyaarisay* – marka aad bulshada tagto, dadku waxay ku weydiin doonaan su'aal noocan oo kale ah. Waxay sidoo kale ku adkeysanayeen ballanqaadyada. Waxaan haynaa ballanqaadyo aan u baahannahay inaan fulino – tusaale ahaan, warqadda cilmi-baarista ayaa dib ugu soo noqon doonta, waa ballanqaad. Waxay ku jiri doontaa Kreyol, waa ballanqaad. Kani ma aha ballanqaad oo keliya, waa xaqiiqo: iyagu waa cidda iska leh cilmi-baarista.

TIXRAACYADA

Brunger, F. and Bull, J. (2011) 'Whose agenda is it? Regulating health research ethics in Labrador', *Études/Inuit/Studies*, 35(1/2), pp. 127-142.

del Campo, F.M. et al. (2013) 'The Development of the Bronx Community Research Review Board: A Pilot Feasibility Project for a Model of Community Consultation', *Progress in Community Health Partnerships*, 7(3), pp. 341-52.

Cross, J.E., Pickering, K. and Hickey, M. (2015) 'Community-Based Participatory Research, Ethics, and Institutional Review Boards: Untying a Gordian Knot', *Critical Sociology*, 41(7-8), pp. 1007-1026. Available at: <https://doi.org/10.1177/0896920513512696>.

Glass, K.C. and Kaufert, J. (2007) 'Research Ethics Review and Aboriginal Community Values: Can the Two be Reconciled?', *Journal of Empirical Research on Human Research Ethics*, 2(2), pp. 25-40. Available at: <https://doi.org/10.1525/jer.2007.2.2.25>.

Kwan, C. and Walsh, C.A. (2018) 'Ethical Issues in Conducting Community-Based Participatory Research: A Narrative Review of the Literature', *The Qualitative Report*, 23(2), pp. 369-386.

Shore, N. (2007) 'Community-Based Participatory Research and the Ethics Review Process', *Journal of Empirical Research on Human Research Ethics: An International Journal*, 2(1), pp. 31-41. Available at: <https://doi.org/10.1525/jer.2007.2.1.31>.

Xog ku saabsan Mashruuca SoCap Project

Mashruuca Doorka Xiriirka Bulshada ee Arimaha Burburka iyo Dagaalka Magaalladu dhaliyeen (SoCap) waa mashruuc cilmi baaris sadex sano socday oo ay maal gelisay Irish Aid laguna fuliyay iskaashi lala sameeyay Concern Worldwide. Wuxuu si nidaami ah u qiimeynayaa isdhexgallada u dhexeeya xiriirka bulshada, adkaysiga, bii'ada magaallada, iyo dagaalka iyo khalkhalka ka jira bulshooyinka magaallada ee la faquuqo ee wadamada Haiti, Somalia iyo Somaliland.

Cilmi baaristaan qaababka isku dhafan leh waxay diirada saaraysaa fahanka sida tubaha dhaliya xiriirada bulshada oo noqda adkaysi u dhexeeya kooxaha magaallada ee la faquuqo labadaba loo ilaaliyo loona adkeeyo, si loo aqoonsado qodobada farsamo ee muhiimka u ah fuliyaasha shaqada iyo xeerka.

Kooxda cilmi baarista waxaa ku jira Jessica Hsu, Haiti Impact Group, Louino Robillard iyo Rubson Brumaire, Gwoup Konbit, Haiti; Manar Zaki and Brenton Peterson, Consilient, Somalia iyo Somaliland; Dr Kelsey Gleason, University of Vermont; Dr Ronak Patel, Nova Frontlines; iyo Dr Caitriona Dowd iyo Dr Kelsey Rhude, University College Dublin.

Fikradaha, ra'yiyada iyo faalooyinka halkaan ku jira gebi ahaanba waa masuuliyada qoraayaasheeda mana matalayaan xeerka Irish Aid.

Sida loosoo xigto meelaha laga soo qaatay daabacaadaan:

Hsu, Jessica, Louino Robillard, Kelsey Rhude, Ronak Patel, Kelsey Gleason and Caitriona Dowd. (2025). Community-Based Research Review Processes. SoCap Learning Note No. 1.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca SoCap, fadlan booqo: <https://www.concern.net/knowledge-hub/social-capital-and-resilience-fragile-and-conflict-affected-urban-contexts>

